



Cadayn Deganaasho iyo Iskufilaansho

Magac:

Kaadh cadayn iyo dhalasho:

**Waxaan halkan ku cadaynayaa, inaan shaqeyn doono si aan u masruufo Caruurtayda halkan ku nool iyo Xaaskayga/ qofka aan la noolay, inaan xubin firfircoon ka noqdo iyo inaan wax ku siyaadiyo mujtamaca Dhaanishka ah.**

**Waxa aan cadaynayaa waxyaabaha hoos ku qoran:**

- Anigu waxaan ilaalinayaa dhinc kasta marka loo eego sharciga Dhaanishka oo Ixtiraamayaa Mabaadiida Dimuqraadiga.
- Anigu waxaan qirayaa, in Luqada Dhaanishka iyo aqoonta Mujtamaca Dhaanishka ay tahay fure fiican iyo firfircooni nololeed.
- Aingu waxaan qirayaa, in qof kasta oo muwaadin ah iyo xaaskiisa , in masuuliyada ka saarantay inuu shaqeysto wuxu ku noolaan lahaa.
- Anigu waxaan qirayaa, in Rag iyo Dumar isku Waajibaad iyo xuquuq yihiin Dhenmaarig, oo Ragga iyo Dumarku isku si wax ugu soo kordhiyaan Mujtamaca, Ragga iyo Dumarku waa isku xuquuq- oo mararka qaarkooda waa waajib, sida Ragga iyo Dumarku waa isku xuquuq in ay ka qeyb qaataan habka Dimuqraadiyada. Labadooduba Ragga iyo Dumarka , waxa waajib ah in ay bixiyaan Cashuurta iyo ay hantiyaan xilka ka saaran caruurtooda.
- Aniga waxa aan ogahay in Dhenmaarig ay tahay Ciqaab , in Xaaska la qaraaco, ama la khasbo iyadoo sharciga la jebinayo , xaaska iyo Caruurta kale ee halkan ku nool.
- Waxa aan qirayaa, in Dhenmaarig ay isku ixtiraam yihiin , iyo fursadaha horumarinta Caruurta oo dhan , labaduba Wiilal iyo gabdho-si ay ugu barbaaraan muwaadiniin firfircoon, oo gaadhi kara go'aan keligood. Waxa aan ku dedaalayaa in caruurtaydu helaan barbaarinta ugu fiican iyo waxbarsho, oo isla markaa ay si firfircoon uga qeyb qaataan mujtamaca Dheenishka. Waxa ka mid ah waxa aan isku deyaayaa in cunugaygu barto afka Dheenishka sida ugu dhakhsaha badan, oo xariif noqdo, oo waxa aan la shaqeynayaa si firfircoon Xannaada iyo Iskuulka.
- Anigu waxaan ogahay in Gudniinka Hablaha iyo guurka khasabka ah , in Xabsi lagu galo Dhenmaarig.
- Anigu waxaan ixtiraamayaa qofkasta xoriyaadiisa iyo Sharafnimada Shakhsiyada, Sinaanta Ragga iyo Dumarka, Diimaha iyo xoryatul qawl Dhenmaarig.
- Anigu waxaan ogahay , cunsuriyada ku timaada sida, dhadig ama lab,iyo midabka jidhka ama hanjebaad, ku jeesjees koox , iyada oo sal looga dhigayo sida Diin ama hab galmo, waa ciqaab Dhenmaarig.

- Anigu waxaan qirayaa, in mujtamaca dhaanisku inuu si weyn uga soo horjeedo Argagixisada. sida la aqoonsanyahay, waxa loo gaystaa ula kac , taasi oo khatar u ah nolosha bilaadmiga iyo daryeelka ama tirarka mujtamaca, , oo aan sameeyo waajibka igu aadan, sida inaan booliska waco, oo hadii aad wiciweydo waa ciqaab iyo ganaax ama xabsi ilaa 3 sanno ah , hadii uu dembigu dhaco adoo arkayaga ama la isku dayo oo aad boliiska wicweydo.
- Anigu waxaan qirayaa, in aan firfircoonaado oo ka qeyb qaato mujtamaca Dhaanishka, muddo kasto aan wadanka joogee.
- Waxa aan ogahay , joogitaankayga Dhenmaarig inuu ku salsanyahay, inuu yahay ku meel gaadh.
- Waxa aan ogahay, marku qofku qaxooti yahay, khasab ma aha in deganaasho la siiyo, hadii ay isbedesho xaalada wadankii uu ka yimi, oo aanay jirin xaaladii qaxootiga lagu siiyey, oo lagu celin doono wadankii uu ka yimi .Waxa aan ogay in hadii reer lagu keeno marka aad qaxooti tahay, aanay khasab ahayn in deganaasho la siiyo, hadii qofkii halkan magan gelyada la siiyey uu haajiro.. Waxa aan ogay sharciga ku meel gaadha ah lagaa qaadi karo ama aan luguu dheerayn mudadiisa.
- Waxa aan ogay firfircooni ka qeyb qaadsho, oo wax lagu kordhiyo mujtamaca Dhaanishka in ay xoojinayso , marka aad wadankii ku noqoto.
- Waxa aan ogahay, qofka ajinebiga halkan ku nool, inuu codsan karo kaalmo dhaqaale Sharciga dibucelinta, aad ku noqonayso wadankaagii, ama wadan kale hadii aad doonayso.

### **Aniga oo ah Qaxooti imika yimi- waxa aan ogahay , in qaxootiga hadda yimi laga rabo:**

(Qodobada hoos ku qorani waxay khaas u yihiin Qaxootiga imika yimi, oo saxiixaya Cadaynta)

- Waxa aan baranayaa luqada Dhaanishka, si ay iigu fududaato ogaanshaa macluumaadka mujtamaca Dhaanishka. Waxa aan ogahay in aan luqada Dhaanishkaka baran karo, hadii aan ka qeybqaato Waxabarshada Luqada, oo ay iigu deeqaan Kammuunahu.
- Waxa aan ku dedaalayaa sidii aan isu deberi lahaa, aniga oo ku biiraya suuqa shaqada fursada ugu dhakhsaha badan. Waxa aan ogahay in ay iga caawinayso, in aan shaqo caadi ah helo, oo aan isku filnaado, oo aan ka qayb qaato hawlaha , lagu sheegay heshiiska aan laga galay kamuunaha.
- Waxa aan ogahay dheeraynta sharcigayga in ay ku xidhantay, hadii ay weli jirto sabatii la igu siiyey sharciga, oo aanay khasab ahayn in qofka qaxootiga ah la siiyo Sharci, hadii ay meesha ka baxaday magan gelyadii lagu siiyey, oo uu wadankii ku noqon karo..Waxa aan ogahay qofka la keeno oo loo keeno qof qaxooti ah, in aanay ugu horayntii khasab ahayn in sharci la siiyo, hadii qofkii qaxootiga ahaa ee loo kenay , ay mesha ka baxdo magangelyadii qaxootiga lagu siiyey.